

# **BARASHADA AFKA MAAYGA**

## **BUUGGA 1-AAD**



**QALINKII: C/RAXMAAN YUUNIS ABSHIR  
( CAQIIL )**

*Bismillaahirraxmaanirraxiim***Tusmada buugga**

Qaabka lagu baran karo AF cusub .....	4
Taariikhda Afka maayga.....	6
Farta maayga.....	9
Cutubka 1aad: Alifbeetada afka maayga.....	10
Cutubka 2aad: Dhawaaqa xarfaha.....	11
Cutubka 3aad: Shaqalka.....	14
Cutubka 4aad: Tilmaamaha.....	18
Cutubka 5aad: Isbarasho.....	20
Cutubka 6aad: Waqtiga.....	23
Cutubka 7aad: Qoyska.....	25
Cutubka 8aad: Bilaha sanadka.....	28
Cutubka 9aad: Safarka.....	30
Cutubka 10aad: Suuqa.....	32
Cutubka 11aad: Waxbarashada.....	35
Cutubka 12aad: Caafimaadka.....	38
Cutubka 13aad: Cuntada .....	42
Cutubka 14aad: Afka iyo dhaqanka.....	46
Cutubka 15aad: Shaqooyinka.....	49
Ereyo.....	52

---

## MAHADCELIN

Mahad oo dhan waxay u sugnaatay Allah Subxaanahu watacaalaa oo ii suuragaliyay inaan wax qori karo waxna akhrin karo, intaa kadib, waxaan u mahadnaqayaa dhammaan dadkii igu dhiirigeliyay inaan soo saaro buuggan, sidoo kale waxaan u mahadcelinyaa waalidiintayda iyo saaxibadayda iyo guud ahaan bahda waxbarashada oo kaalin mug leh ka qaatay horumarinta afkeena hooyo.

## HIBAYN

Dhiganahan waxaan u hibaynayaa Waalidiintayda qiimaha badan, oo igu soo barbaariyay tarbiyo wanaagsan iyo ixtiraam bulsho, kuwaas oo igu dhiirigeliyay wabarashada iyo ka faa'idaysiga waqtiga, Hooyo iyo Aabe abaalkiina lama gudi karo, Hoygiina jannada Firdows Alle ha ka dhigo..Aamiin.

## AFEEF

Waxaan shaki ku jirin in meelaha qaar ee buugga dood laga keeni karo, aniga oo ka duulaya arrintaasi waxaan idinka codsanayaa in meelihii dib u sixid u baahan aad ila soo wadaagtaan si aan u saxo, sidoo kale arimo kale oo muhim aad u aragtaan aad ii soo sheegtaan si aan ugu soo daro qaybaha kale ee buugga.

## Muxuu ku saabsanyahay buuggan?

Buuggan wuxuu si kooban uga hadlayaa farta maayga (Alphabets) taas oo aad u anfacaysa dadka ku hadli kara afka maayga iyo sidoo kale dadka aan aqoon u lahayn afka maayga wuxuu ka caawin doonaa buuggan haduu Alle idmo inay bartaan ereyada aasaasiga ah iyo jumladaha caanka ah ee afka maayga iyo sida loo qoro.

Sidoo kale wuxuu u sahli doonaa inay si wanaagsan u fahmaan dadka ku hadla afka maayga oo maanta dad badan oo soomaaliyeed aan aqoon u lahayn xitaa inuu jiro af lagu magacaabo maay oo malaayiin soomaaliyeed ku hadlaan, sidoo kale dad badan oo soomaaliyeed ayaa ka carooda qofkii afkan kula hadla, annaga oo og in kala duwanaanshaha afku kamid yahay aayadaha ilaahey Subxaanahu watacaalaa, ilaahey Sw wuxuu ku yiri quraankiisa

وَمِنْ آيَاتِهِ خَلْقُ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ وَاجْتِلَافُ السِّنِّتِكُمْ وَأَلْوَانِكُمْ إِنَّ فِي ذَلِكَ لَآيَاتٍ لِّلْعَالَمِينَ.

" Waxaa ka mid ah Aayaadka ku tusin (Qudrada) Eebe samooyinka uu abuuray iyo Dhulka iyo kala duwanaanta Afkiina (Luuqada) iyo midabkiinaba, taasina calaamad ayaa ugu sugan kuwa Cilmiga leh" Suuratu Ruum aayadda 22.

Umadda soomaaliyeed waxay inta badan isweydiyaan in af maaygu leeyahay far u gaar ah oo la qori karo, balse waxaa la heli karaa buugaag ciidaas ka badan oo af maaygu laga barto cidii xil iska saarta barashada afmaayguna waa ay heli karaan buugaag Maay ah oo English ku turjuman waan u imaan doonaa taariikhdiisii la qoray farta maayga laakin buuggii ugu horeeyay ee afka maayga aan akhriyey wuxuu ahaa Elif Maay wuxuuna ku qornaa English 2014 tii ayay ahayd inkastoo anigu aan ku soo dhex barbaaray deegaan afmaayga looga hadlo si wanaagsan ayaan ugu hadli jiray

Afmaayga, qaar badan oo dadkeena kamid ah ayaa iska dhaadhiciyay inaysan afmaaygu baran karin laakin English ka iyo Carabigu waa ay baran karaan, Cajiib! Waxay isku qanciyeen in barashada maaygu aan waxba ku soo kordhinayn balse ma oga in afmaaygu yahay af dhamaystiran oo aan erayo iyo kalmado shisheeye laga heli karin.

Noloshayda inteeda badan waxaan ku qaatay magaalada Baydhabo iyo degmooyinka ku teedsan fursadna uma helin inaan inbadan joogo dhulka looga hadlo (Maxaaga) badalkeeda intaan ku ekaan lahaa afmaaygayga waxaan bilaabay barashada maxaaga ka hor intaan dugsiga hoose bilaabin sidoo kale dhagaysiga dadka ku hadla maxaaga sida warbaahinadda, Barnaamijyada Tv-yada iyo Raadiyaasha, Muxaadarooyinka culimada, sheekooyinka xikmada leh, iyo akhrinta buugaagta dugsiyada hoose, dhexe, sare, iyo buugaagta kale waxay iga caawisay inaan si wacan ugu hadlo una qoro afsoomaaliga (Maxaaga). Ugu dambayn tallaabooyinkan aan qaaday hadii aad u adeegsato barashada maayga waxaad si qoto-dheer u baran doontaa afka maayga sidoo kale inaad kula hadli karto qof maayga ku hadla hadii aad la kulanto waa qodob kale oo muhim ah.

### **QAABKA LAGU BARAN KARO AF CUSUB:**

1. Waa inaad wax badan ka akhridaa afka adiga oo xoogga saaraya alifbeetada afka, kalmadaha, weerooyinka, adiga oo ka akhrinaya buugaagta, wargeysyada, boorarka, iwm.
2. Waa inaad inbadan dhegeysataa dadka ku hadla afkaas, waa hab aad u qurxoon oo aan u adeegsaday inaan afaf badan ku barto, inaan YouTube-yada ka

raadiyo maclimiin sharaxaya afkaas, inaan warbaahinta afkaas in badan dhegaysto ama daawado Tv-yada.

3. Waa inaad in badan dhuuxdaa suugaanta afkaasi, waxaa jira dad aftahano ah oo si wanaagsan wax u curin kara, waxaad xoogga saartaa daawashada gabayada, sheekooyinka xikmadda badan, iyo duruus afkaas ku baxaya hadaad hesho kaba sii wanaagsan.
4. Waa inaad la hadashaa dadka u dhashay afkaas ama garanaya oo ku fiican ku hadalkiisa, waa inaad ula hadashaa sidii qof afkaas ku dhashay oo kale.
5. Hadii aad helayso duruus nidaamsan oo maalinba qayb aad ka barato waa tallaabo aad muhim u ah.
6. Markii aad akhrinayso luuqad aad doonayso inaad barato waxaa habboon inaad codka sare u qaado si aad ula qabsato ku hadalka afkaasi.
7. Ha isku mashquulin inaad naxwaha afka barato bilowgiiba, waan ognahay inay muhim tahay barashada naxwaha afka, balse marka aad luuqadda waxbadan ka barato oo aad ugu hadli karto sidii dadka u dhashay afka ayaad dib ugu laaban naxwaha.
8. Waxaa lama huraan ah inaad hesho qaamuuska afkaasi, si aad uga baarto ereyada aad u baahantahay iyo weeraha aad dhisayso.
9. Waxaa wanaagsan inaad hesho aaladaha wax lagu duubo si aad u xusuusato duruustii aad soo akhriday.
10. Ugu dambayn Dulqaad iyo dhabar-adayg badan muuji, waxaan shaki ku jirirn in marar badan aad ka caajisto ama kugu adkaadaan akhrinta luuqaddan balse waxaad leedahay hadaf ah inaad barato luuqad, haddii

aad ku guuleysato barashada luuqadaasi waxaa kuu durmi doona daaqado badan oo aad luuqado kale ku baran karto,

- Tijaabooyinkan waxaan ku bartay luuqado kala duwan, sidoo kale waxaan u isticmaalaa inaan luuqado cusub ku barto.

### **Taariikhda Afka maayga**

Guud ahaan afka soomaaliga iyo inta badan afafka looga hadlo geeska afrika waxaa lagu magacaabaa "Kushitik" waxayna sii galaan bahda "Afro-Asiyatik" ama "Hemo-semitik" oo ay ku wada jiraan dhowr bahood oo kala ah(Semitik, Berber, Afkii masaaridii hore, Jadik, iyo Omotik).

Kala guuritaankii bahda "Kushitik-ga" waxay sababtay in afafka ay gaar u noqdaan bulsho kooban, waxyaabihii sababay kalaguurkii bahda kushitik waxaa kamid ahaa in Geeska afrika ay deganaayeen xoolodhaqato, iyo dadkii deegaanka oo halkii roob iyo biyo laga helo u guuri jireen

Afka soomaaliga wuxuu qayb firfircoon ka ahaa bahdii kushitik waxaana geeska afrika hogaanka u qabtay waqtigaasi laba af oo kala ahaa Cafari, iyo Soomaali oo Maay la dhihi jiray (dadka Soomaaliduna ku hadli jireen) kadib Afkii Soomaaliga ayaa u kala baxay dhowr lahjadood.

Afka soomaaligu markii dambe wuxuu ku fiday geeska afrika, waxaana lagu qiyaasaa da' ahaan labao kun ilaa iyo seddex kun oo sanadood inuu jiray.

sidoo kale waxaa soo kordhay in geeska afrika ay ahayd goob muhim u ah marinka ganacsiga iyo maraakiibta adduunka, taasi oo sababtay in ganacsato carbeed,Hindi, iyo xitaa Bortuqiis ay soo degaan dalkeenii, waxaana bilowday isdhexgal dhowr bulaho oo kala af iyo shaqan duwanaa,

waxaa soo baxay lahjado afafkaasi u dhow, Tusaalaha ugu dhow waa afka Baraawaniga oo laga helo ereyo Bortuqiis ah iyo afka maxaaga xitaa oo laga helo ereyo carabi iyo Hindi ah, Qarniyaddii dambe afka maayga wuxuu ku soo uruuray goboladdii koonfureed ee dhulka soomaalida, xilligii isticmaarka afka maayga waxaa si toos ah loogaga hadli jiray laga bilaabo Muqdisho iyo guud ahaan lixda gobol ee koonfurta soomaaliya, dhulka soomaali galbeed, iyo dhulka soomaalida NFD oo weli raadkiisu ku dambeeyo.

Waxaa jirta silsilad gabayo ah oo afka maayga uu tiriyay sheekh caan ka ah koonfurta soomaaliya oo la yidhaahdo sheekh Cabdulle isxaaq oo deganaa magaalada Baardheere ee gobalka gedo, gabayadiisa wuxuu kaga hadlayaa arimaha diinta, kuwa qoyska, iyo arrimo badan, waxaa la sheegaa shiikhu inuu adeegsaday farta carabiga si uu gabayadiisa afka maayga ugu qoro, wuxuuna geeriyooday ka hor inta aan isticmaarku soo galin dhulka soomaalida.

Waqtigii xorriyadda waxaa jiray dadaalo badan oo ay sameeyeen dowladihii dalka soo maray, Inkastoo aan mirodhalin dadaaladaasi, markii uu dhashay kacaankii militariga oktoobar 1969 waxay isku dayeen in laga guuro adeegsiga farta English-ka iyo Taliyaaniga oo inta badan oo adeegsan jiray qoraaladda buugaagta, wargeysyada, iwm.

Markii lagu dhaqaaqay ololihii horumarinta reer miyiga, taasi oo lagu barayey bulshooyinka miyiga jooga qorista Afka soomaaliga, manaahijtii waxbarashada ayaa la afsoomaaliyeeyay, sidoo kale xafiisyadii dowladda ayaa waajib looga dhigay in ay adeegsadaan farta

Burburkii dowladdii dhexe kadib aqoonyahanadii soomaaliyeed intooda badan waxay ka tageen dalka,



jaaliyadaha soomaalida dibada ku nool badanaa waxay xusas iyo xaflado u sameeyaan afka soomaaliga(Maxaaga), mana jirto cid xil iska saartay in afka maayga la uruuryo ugu dambayn na far la isku raacsanyahay la soo saaro,

Sanadkii 2008 dii ayaa aqoonyahano soomaaliyeed soo saaray buug aad u qurux badan oo afka maayga ah 2017 kii ayaan helay pdf-kiisa waana buug aan aad uga faa'iday waxaa ku qoran Sheekooyin,Xikmado,Gabayo, iyo, su'aalo.

Waxaa jira buugaag Maay oo English ku fasiran, sidoo kale qaamuusyo tiro badan oo Maay to Maay ah ama Maay-To English ah ,

Sanadkii 2018 kii waxaa magaalada Gothenburg ee dalka Sweden lagu qabtay shirweynaha Afka iyo dhaqanka maayga waxaana ka soo qaybgalay aqoonyahano soomaaliyeed iyo ajaanib intuba, ka qaybgalayaashii shirka waxaa ka mid ahaa prof Maxamed Xaaji mukhtaar oo barre ka ah Jaamacadda Savana state University ee dalka maraykanka, wuxuu carrabka ku adkeeyay in aad looga gaabiyay horumarinta afka hooyo, loona baahanyahay in boorka laga jafo.

Sanadahan dambe waxaa soo badanaya dadka wax ku qora afka maayga, gaar ahaan baraha bulshada oo dunidu ay ku wada xiriirto, sidoo kale dad afkooda si kalsooni leh ugu hadla ayaa soo badanaya, waxaase weli dhaliil loo soo jeediyaa masuuliyiinta afka maayga garanaysa oo aanan kaga hadli karin goobaha shaqada, iyo fagaarayaasha intuba.

Waxaa sidoo kale war lagu farxo ah in wargeyso ku qoran afka maayga ay soo baxaan maanta, waxaa jira wargeys bile ah oo lagu magacaabo "Hoghol" wuxuuna si joogto ah wax ugu qoraa afka maayga.

Sidoo kale waxaa jira dhalinyaro isku xilqaamay horumarinta afka hooyo ee Maay,kuwaasi oo bixiya casharo lagu barto afka maayga iyo dhaqankiisa

### ***Barashada farta maayga( Alphabets)***

Afka maayga waxa uu leeyahay alif-beeto u gaar ah waxaana lagu magacaabaa(Alif Maay)

Waxa uu ka koobanyahay afar iyo labaatan shibane iyo shan shaqal iyo sidoo kale hal shaql u yaal.

Inta badan Xarfaha waxa uu kala simanyahay afsoomaaliga(Maxaa) waxaana loogu dhawaaqaa sida Btj-da farta soomaaliga; balse waxaa jira xuruuf iyo shaqalo si gaar ah loogu dhawaaqo taas oo uu la gaar yahay afka maayga, xuruuftaasi waxaa kamid ah:JH,TH,GH,NG, iwm.

Waxaa kaloo xusid mudan in Afmaaygu aan laga helaynin xarfahan: X,C, iyo Kh.

Afmaaygu aad uma adka hadii aad xil iska saarto go'aana ku gaarto inaad barato waad baran kartaa insha Allah, Dhawaaqa xarfaha qaar ee afka maayga waxaa uu u egyahay luuqadaha qaar sida turkiga,carabiga,iwm.

Tusaale Afsoomaaliga(Maxaa) kuma jiro shaqal uyaalka ( Y ) oo dhawaaq ahaan u eg A ama I dhexdooda, sidoo kale xarafka ( GH) ee Elif maayga wuxuu u dhowyahay xarafka (Ġ) carabi ahaan oo la fududeeyay ama xarafka(Ğ) ee Turkiga.

Xarafka "TH" waxaa loogu dhawaaqaa sida xarafka TH ee English-ka.

Xarafka "NG" waxaa loogu dhawaaqaa sida dhamaadka Ereyada ingiriiska Morn-ing,Eating, driving, iwm.

## Cutubka 1aad

## ALIFBEETADA AFKA MAAYGA

## Shibly wywiing/ xarfaha waaweyn:

B P T J JH D TH R  
 S SH DH GH G F Q K  
 L M N NG W H Y NY

## Shibly yeryer/ Xarfaha yaryar:

b p t j  
 jh d th r  
 s sh dh g  
 gh f q k  
 l m n ng  
 w h y ny

## Shahal wywiing/ shaqal waaweyn:

A E I O U

## Shahal yeryer/ shaqal yar:

a e i o u

## Shahal ing yaal/ Shaqal uyaal:

Afka maayga wuxuu leeyahay hal shaqal uyaal kaas oo ah xarfka "Y" xarfkan dhawaaqiisu wuxuu ka duwanyahay (e, iyo i) oo u dhowyahay balse aad uga duwan wuxuu u egyahay shaqalka(i) ee Af turkiga,

Shaqal uyaalka ( Y ) waxaa loo isticmaalaa dhawaaqa ugaarka ah ee afka maayga English ahaan waxaa ugu dhow in loo qoro sidan(eih), taasi oo inta badan laga sareemo dhamaadka kalmadaha afka maayga.

***Tusaale:***

Toory(mindi), Seedy(seedi), Baahy(gaajo), waraapy(dhurwaa).

▪Maadaama xarafka [ Y ] loo isticmaalay shaqal iyo shibane si loo kala garto marka ay shaqal tahay iyo marka ay shibane tahay waxaa loo sameeyay shirci la yiraahdo( Shorongshoor).

**Shorongshoor:**

- Hadii xarafka ( Y ) hortiiisa shaqal jiro waxay noqonaysaa shibane,

***Tusaale:***

Maay, Gooy(Gawsaha), Kooy(kaalay), Dhaay(Nadiif).

- Hadii xarafka ( Y ) hortiiisa shibane jiro waxay noqonaysaa shaqal,

***Tusaale:***

Maghy(magac), Yeemby(Yaambo), Lamy( Labo), kopy(Kabo), Mathy(Madax)

**Cutubka 2aad****DHAWAAQA XARFAHA U GAARKA AH MAAYGA**

Afka maayga wuxuu inta badan kala simanyahay xarfaha afsoomaaliga(Maxaa) marka laga reebo 3 xaraf oo aan Afmaayga laga helaynin waxayna kala yihiin: X, C, iyo Kh, xarfahan lagama helayo dhawaaqooda afka maayga bedelkooda waxaa ku jira lix xaraf oo kale waxayna kala yihiin: P, JH, TH, GH, NG, iyo NY,

Xarfahan waxaa loogu dhawaaqaa sidan:

- P: xarafkan dhawaaq ahaan wuxuu u dhowyahay xarafka "P" ee Englishka, waxaana loo adeegsadaa marka xarafka "B"

dhawaaqiisa uu fudud yahay, wuxuu ka yimaadaa xarafkan Bishimaha,

***Tusaale:***

Lipee(Libaax), Hoped(Xabadka),Hopoog(malqabad), Hapiipy(Xabiibo), Hupung(Xubin).

▪JH: xarqfkan wuxuu u gaar yahay afka maayga dhawaaqiisuna wuxuu ka soo baxaa marka la isku qabto gowsaha dambe,

***Tusaale:***

Jhab(jab), Jheer(xishood), Jhaf(meel hawd ah).

▪TH: xarafka "Th" waxaa loo isticmaalaa marka dhawaaqa xarafka "D" uu fududyahay, hadaan si kale u dhigo waa xarafka [ð] ee afka carabiga.

***Tusaale:***

Mathy(Madax), Mathal(kulan), Ithaaley(ido),

▪GH: xarafkan "Gh" wuxuu u gaar yahay afka maayga waa xarafka "g" oo si fudud loogu dhawaaqay iyo xarafka "ğ" ee Af turkiga,

***Tusaale:***

Maghy(magac), Ighaar(wiil), Meghel(nin).

▪NG: Xarafkan "Ng" wuxuu u gaar yahay dhawaaqa af maayga wuxuuna kamid yahay xarfaha loogu isticmaalka badanyahay afmaayga waxaa loogu dhawaaqaa Ereyada ingiriiska qaarkood sida: Giving(ing- da dame) morn(ing) hadaba dhamaadka ereyadan oo kale ayaa loogu dhawaaqaa xarafkan "NG".

***Tusaale:***

Dang(ujeedo), Ming(Qol), Bang(dibadda).

NY: wuxuu u gaar yahay dhawaaqa afka maayga.

**Tusaale:**

Nyaany'y(Yaanyo), Nyaanjury(Bisad), Kismaany'y(kismayo).  
Xarfaha aan laga helaynin afka maayga iyo khaladaadka ka dhalan kara:

Xarfaha aan laga helaynin Elif maayga	Xarfaha bedelka u ah
X: xarfka "x" kuma jiro af maayga bedelkiisa	"H" Ayaa bedel u ah.Tusaale Hasyng(xasan)
Kh xarakan lagama helayo afmaay bedelkiisa	"Q" Ayaa bedel u ah. Tusaale Qaalid(Khalid)
C xarafkan kuma jiro af maayga bedelkiisa	"A" ayaa ku jira sida English Tusaale Aliyow.

**Shalreepy/Kala reebe:**

▪Hadii ay israacaan laba shaqal oo aan ahayn shaqal dheer waxaa lagu kala reebaa shalreepy( ' )

**Tusaale:**

Ba'iid(Baciid), Su'aal(Suaal), Go'(Maro), Daa'uud(Daaud).

Lamy laab/xarfaha laba laabma:

Afka maayga wuxuu leeyahay xarfo labalaama waxayna kala yihiin:{R, iyo L}.

**Tusaale:**

R: Marry(Maro), irry(Qorax), Jarrab(imtixaan).

L: Billaapy(mindi), Mallaay(Kalluun), Hillymy(Riyo).

## Cutubka 3aad

## SHAGHAL GAAB/ SHAQAL GAABAN

A	E	I	O	U	Y
BA	BE	BI	BO	BU	BY
PA	PE	PI	PO	PU	PY
TA	TE	TI	TO	TU	TY
JA	JE	JI	JO	JU	JY
JHA	JHE	JHI	JHO	JHU	JHY
DA	DE	DI	DO	DU	DY
THA	THE	THI	THO	THU	THY
RA	RE	RI	RO	RU	RY
SA	SE	SI	SO	SU	SY
SHA	SHE	SHI	SHO	SHU	SHY
DHA	DHE	DHI	DHO	DHU	DHY
GA	GE	GI	GO	GU	GY
GHA	GHE	GHI	GHO	GHU	GHY
FA	FE	FI	FO	FU	FY
QA	QE	QI	QO	QU	QY
KA	KE	KI	KO	KU	KY
LA	LE	LI	LO	LU	LY
MA	ME	MI	MO	MU	MY
NA	NE	NI	NO	NU	NY
NGA	NGE	NGI	NGO	NGU	NGY
WA	WE	WI	WO	WU	WY
HA	HE	HI	HO	HU	HY
YA	YE	YI	YO	YU	YY
NYA	NYE	NYI	NYO	NYU	NYY

## Shaghal dheer/ Shaqal dheer

AA	EE	II	OO	UU
BAA	BE	BII	BOO	BUU
PAA	PEE	PII	POO	PUU
TAA	TEE	TII	TOO	TUU
JAA	JEE	JII	JOO	JUU
JHAA	JHEE	JHII	JOO	JUU
DAA	DEE	DII	DOO	DUU
THAA	THEE	THII	THOO	THUU
RAA	REE	RII	ROO	RUU
SAA	SEE	SII	SOO	SUU
SHAA	SHEE	SHII	SHOO	SHUU
DHAA	DHEE	DHII	DHOO	DHUU
GHAA	GHEE	GII	GHOO	GHUU
FAA	FEE	FII	FOO	FUU
QAA	QEE	QII	QOO	QUU
KA	KEE	KII	KOO	KUU
LAA	LEE	LII	LOO	LUU
MAA	MEE	MII	MOO	MUU
NAA	NEE	NII	NOO	NUU
NGAA	NGEE	NGII	NGOO	NGUU
WAA	WEE	WII	WOO	WUU
HAA	HEE	HII	HOO	HUU
YAA	YEE	YII	YOO	YUU
NYAA	NEE	NYII	NYOO	NYUU



### Tusaalooyin shaqalka Elif maayga:

A: alang (wiil/ calan), amar, atar(udgoon), areepy(gabar aan nadaafadda ku dadaalin).

E: etheb(asluub), eeney(Aadan), ered(dhabar), ed(cadaan/cod), ehel.

I: id(guri), il, ilmy(cilmi), ilid(cirid), iid(ciid)

O: Obsy(cabsi), Opooy(ayeeyo), ol(colaad), Othii(oday).

U: ulmy(culimo), uur, urug(xanuunka qaaxada), uthug(caraf), usby(Tusbax).

Tusaalooyinka shibanaha Elif maayga:

B: bar, bed(dhul firaaqo ah), bir, bohol(Tog), bur(cad yar).

P: Heped(xabadka), Lipee(libaax), Neped(nabad), Hupung(xubin).

T: Tab, Teneg, Tuky,

J: Jowaang,(kiish) Jeel(jacayl), Jeng(waali).

JH: Jhab(jab), Jhaf(hawd), Jheer(xishood).

D: Dad, dereng(sajaayad), dog(duq), doong(Meel taag ah).

TH: Mathy(madax), Othey(oday), lthing

R: Raky(rah), ri' , ror(rar).

S: Sipir(sibir) So'(hilib)Sed(calaf).

SH: Showly(god dheer), Shafardhig(quraac) Shang(shan).

DH: Dhereg(cunto ka dhargid) Dharbaang(dharbaaxo) Dhirif(xanaaq).

G: Ger(gadh)gow(meel taag ah), gangfuur(weji).

GH: Oghaal(ka warhayn), Ughaar(xoolaha la ugaarsado),Meghel(rag).

Q: Qaras(dareen labo labo ah), Qashyng(Qashin),

Qalawleey(Nooc shimbiraha waaweyn kamid ah)

K: Kor(Jirka), kathaloob(jilbo laabasho fadhi),  
Kar(Dhar),kiyow(kicin)

L:Lang(qof), Legdeng(Hardan), Loo'(Lo'),Ludaay(cayayaan  
ayaxa ka weyn),

M: Masiir(masayr), Meghyng(magan), Mogdy(mugdi),  
Maas(amaah)

N: Nipir(nabar) Nuughow(dhuuqid), Nahriis(naxriis).

NG: Lang(nin), Bang(dibad), Fing(finanka wejiga),  
Dang(xaajo).

W: Withaay(saaxiib), Wehel, Withaang(wadaanta biyaha laga  
darsado).

H: Heped(xabad)hergel(hurdada duhurkii, Hir(hirarka  
biyaha), Hawaal(xabaal).

Y: Yoong(canaan),Yas/Yes(xaqiraad), yeemby(yaambo).

NY: Nyaanyury(bisad), Nyagaf(saqafka guriga),  
Kismaanyy(Kismaayo).

### ▪Layli:

1. ku dhawaaq oo garo micnaha ereyadan soo socda:  
Raky,                      Showly,                      shafardhig,  
jhaf,                      lang,                      mehel.
2. Waa maxay "shorongroor"? Qor labada qaacido uu  
leeyahay shorongshoor.
3. Qor xarfaha labalaabma ee afka maayga, adiga oo  
Tusaale ka bixinaya.
3. Higaadi oo ku dhawaaq ereyadan soo socda:  
Withaay,sipir,mathy, ithaaley, Fiithey,  
Beghel, Bitheer, Garaafy, Batoor, Ming-hoory.



---

**•Layli**

ka jawaab su'aalahan soo socda:

1. U bedel tilmaamahan soo socda afka maayga.
  - Taasi waa xamdi, Kaasi waa xaashi
  - annagu waxaan nahay arday
  - iyadu waa maclimad).
2. U bedel tilmaamahan soo socda afka maxaaga:
  - Yo maybuwa injineere wadangky
  - Haang maybuwa dadki haniing martiyy
  - Usy maybuwa Aliyow
  - Tang maybuwa ariito
  - ising mayba etiiny dad feyly

## Cutubka 5aad

## Is-waraysi iyo is-barasho afmaayga

AFMAAY	DHAWAAQ	MAXAA
Ky salaami	Ki salaami	Waan ku salaamay
Koo qaathi/koo usi	Koo qaathi/koo usi	Waan kaa qaaday
Maghaagha may ly ere?	Magaaga may li ere?	Magacaaga maxaa la dhahaa
Any eethinga ly i ere athiiny?	Ana eedin ya li i ere adiina?	Anigu aadaan baa lay dhahaa adna?
Meegha siny jerty?	Meega sini jarta?	Imisa sano ayaad jirtaa?
Mayba ky farahsyna isbarathowkeeng.	Mayba ki farahsanaa isbarathowkeen	Waxaan ku faraxsanahay is barashadeena
Any lang wiinga eha	Ani lan wiina eha	Anigu qof weyn baan ahay.
Ha dhowaaw	Ha dhawaaw	Soo dhawoow
Mahadsyngty	Mahadsinta	Waad mahadsantahay
Eetha ing feylaha	Eetha in feylaha	Aad baan u fiicanahay
Kulung demby o hiisy leh	Kulun damba o hiisa le	Kulan dambe oo xiisa leh
Ebehey ky neped jeeyy	Ebehey ki neped Jeeyi	Alle ha ku nabad geeyo
Athiiny saas haatow	Athiina saas haatow	Adiguna sidoo kale
Guul ya kiing rajeeye	Guul ya kiin	Guul ayaan kuu

	rajeeye	rajaynayaa
Bariisy feyly/Hiraab feyly	Bariisa feyla/hiraab feyla	Subax wanaagsan
Haalyda ky warang/sithe ety?	Haaladda ku waran/ sithe eta?	Xaaladaada ka waran/ sidee tahay?
Neped i fiyaawang ilaahey ya mahad usku leh	Newed i fiyaawang ilaahey ya mahad usku leh	Nabad iyo ladnaan, ilaah baa mahad iska leh
Fiid feyly	Fiid feyle	Maqrib wanaagsan
May erti/ may teri?	May erti/ may teri?	Maxaad dhahday/maxaad tidhi?
Hatta waaky niing bariyey	Hatta waaki niin bariyey	Hadda ayuu waagii noo baryay
Geegy farhadey mal hakoopy kory	Geega farhadey mal hakoowu koru	Maanta farxadayda lama soo koobi karo
Haye, any sii bahey, nepethey	Haye, ana sii bahey, newethey	Haye, anigu waan sii tagayaa, nabadgalyo
Ing batow withaayow, usku roog	Ing batoy withaayow, usku roog	Ha bixin saaxiib, iska joog
Geego kaly ya is aryghaany	Geego kale ya is araghaana	Maalin kale ayaan is arkaynaa

## Layli

ka jawaab su'aalahan soo socda:

1-U bedel weerooyinkan soo socda afka maayga.

- Alle ha ku nabad geeyo,
- Soo dhawoow
- kulan dambe oo xiiso leh

2-Akhri oo u bedel weerahan soo socda afka maxaaga.

- Athiiny saas haatow
- mayba ky farahsyna isbarathowkeeng
- Eetha ing feylaha

---

**Cutubka 6aad**
**Amyng:Wagtiga**

MAAY	DHAWAAQ	MAXAA
Meeghy sa'wu?	Meegha sa'wu?	Saacadu waa imisa?
Tumung sa' i bar yu	Tumun sa' i bar yu	Waa afartii i 30 daqiiqo
Billy geeky meeghawu?	Billi geeka meegawu?	Bishu waa imisa maanta?
Ame dhalyti?	Ame dhalati?	Goormaad dhalatay?
Any Mayba dhalathey 1998	Ani mayba dhalathey 1998	Anigu waxaan dhashay 1998
Bil se e ky jerny?	Bil se, ee ki jarna?	Bishee ayaan ku jirnaa?
Mayba ky jerne billi koowaad	Mayba ki jarne billi koowaad	Waxaan ku jirnaa bishii 1aad
Geeky jeer se eewu?	Geeka jeer se eewu?	Maanta waa maalintee?
Geeky maybuwa ehed	Geeka maybuwaa ehed	Maanta waa Axad
Umrygha Ally kiing dheereyy	Umrigha Alla kiin dheereyi	Cimrigaaga Alle hakuu dheereyo



---

## Layli

ka jawaab su'aalahan soo socda:

1-Akhri oo ubedel afka maxaaga weerahan soo socda:

- Ame dhalyti?,
- Umrygha Ally kiing dheereyy
- Geeky jeer se eewu?

2-U bedel weerooyinkan soo socda afka maayga:

- ❖ Maanta waa Axad,
- ❖ waxaan ku jirnaa bishii labaad,
- ❖ Anigu waxaan dhashay 1992.

---

**Cutubka 7aad**
**Qoosky i Qaraapythy/Qoyska iyo qaraabada.**

1 aawkey	aabahay
2 aathey	hooyaday
3 opoothery	ayeeya-day
4 opooghey	awoowe-hay
5 etheerkey	adeer-kay
6 inaathey	eeda-day
7 abtyghey	abtigayga
8 ahy'yertey	habaryar
9 walaalkey	walaal-kayga
10 walaaley	walaashayda
11 dumalyghey	dumaashigay
12 dumalythey	dumaashiday
13 seedyghey	seedigay
14 seedythey	.....
15 sodyghey	soddogayga
16 sodythey	soddohdaya

**Jumlythy qoosky/Jumalado ku saabsan qoyska:**

Maay	Dhawaaq	Maxaa
Maghaaghey mayba ly erey Keerow Aliyow Maamuud	Magaagey mayba li erey keerow Aliyow maamuud	Magacaygu waa keerow(Kheyre) cali maxmuud
Aawkey maybuwa Aliyow maamuud	Aawkey maybuwa Aliyow maamuud	Aabahay waa Cali maxmuud
Aathey/Umaathey ny maybuwa Fiithey hasynow	Aathey/Umaathey na maybuwaa Fiithey Hasanow	Hooyaday waa fiidey(Ubax) xasan
Opooghey Aw maamuud dheery mayba rooghe baadiyaathy	Opoogey Aw maamuud mayba rooge baadiyaathi	Awowgay Aw maxmuud wuxuu joogaa baadiyaha
Opoothey Hathiiy mayba ky noole dalky ingiriisky	Opoothey Hathiija mayba ku noole dalka ingiriiska	Ayeeyday khadiijo waxay ku nooshahay dalka ingriiska
Ah'yartey iishy mayba degynta beledky mogdiahy	Ah'yartey iisha mayba degentabeledka mogdisha	Habaryartayda iisha(caasha) waxay degentahay magaalada muqdisho
Etheerkey mayba ing shaqeeyey shirkyd dayuurytheed	Etheerkey mayba in shaqeeyey shirkid diyaaratheed	Adeerkeyga wuxuu u shaqeeyaa shirkad diyaaradeed
Abtyghey Eenow	Abtigey Eenow	Abtigay

mayba wal ku dhikey jaama'atho dalky	mayba wal ku dhikey jaama'tho dalka	Eenow(Adan) wuxuu wax ka dhigaa jaamacadaha dalka
Walaaley mariing mayba dhikythaase dugsy kory	Walaaley mariing mayba dhikithaase dugsi kore	Walaashayda maryan waxay dhigataa dugsigaa sare
Inaathey mayba jarte beero	Inaathey mayba jarte beero	Eedaday waxay jirtaa beeraha

### ▪Layli

ka jawaab su'aalahan soo socda:

1-U bedel weerooyinkan soo socda afka maayga:

- Hooyaday waa naciima cabdi,
- Awowgay Xasan maxamed waxa uu joogaa baadiyaha.
- Habaryartayda Raxma waxa ay dagantahay Hargeysa,
- Magacaygu waa Cabdullaahi Faarax.
- Abtigay Liibaan wuxuu u shaqeeyaa shirkad diyaaradeed.

2.Akhri oo u bedel Afka maxaaga weerahan soo socda:

- Inaathey iishy mayb roogde Baardheery.
- Aathey mayba ki jarte jikoothy.
- Opoothey mayba jarte beero.

---

**Cutubka 8aad**
**Sitimaangky i bilo/ Isbuuca iyo bilaha:**

Sabty	Sabti
Ehed	Axad
Asniing	isniin
Telaathy	Talaado/salaaso
Arbaa	Arbaco
Kamiis	Khamiis
Jimaa	Jimco.

Shaley	Maalintii shalay
Shalmey-geerad/daraad	Maalintii shalay ka horraysay
Owhoraad	Xalay
Beriyey	Maalinta berri
Bery damby	Maalinta berri ku xigta
Geeky	Maanta
Oowky	Caawa

**Bilo sinidky/Bilaha sanadka:**

1-Seky	2-Safar	3-Mowluud	4-Milly-hory
5-Milly dhahy	6-Milly demby	7-Shaabaang hory	
8-shaabaang demby	9-soong	10-soong-fur	
11-seetal	12-Aarafy.		

**Fasale sinydky/Xilliyada sanadka.**

Jiilal	Jiilaal
Haghaay	xagaa
Gu'	Gu'
Deer	Dayr.

**Jumlytho afarta fasal/ weerooyin ku saabsan afarta xilli.**

MAAY	MAXAA
Jiilaalki hory biyi yaraang ya jerti	Jiilaalkii hore biyo yaraan baa jirtay
Deertung wal yaable quputi	Dayrtan si fiican baa roob u da'ay
Haghaaykung lamaathung gee may haayi? ileeng haghaay ya lyky jarey	Xagaagan labadan maalmood muxuu ahaa? Ilayn xagaa baa lagu jiraa
Gu'kung beero eetha aarang ing eying	Gu'gan beeraha aad bay u barwaaqaysteen

**Layli**

ka jawaab su'aalahan soo socda:

1- U bedel weerooyinkan soo socda afka maayga:

- ✓ Jiilaalkii hore biyo yaraan baa jirtay,
- ✓ Gu'gan beeraha aad bay u barwaaqaysteen.

2-Ku dhawaaq oo u bedel weerooyinkan soo socda afka maxaaga:

- ✓ Deertung wal yaable quputi.
- ✓ ileeng haghaay ya lyky jery.

3- Qor 12 ka bilood ee afka maayga.

## Cutubka 9aad

Jumlytho safarky/ Weerooyin ku saabsan safarka:

MAAY	DHAWAAQ	MAXAA
Geegy mayba ing jeethe safar	Geega mayba injeethe safar	Maanta waxaan u socdaa safar
Wiligha Moqdishy seetey?	Wiliga Moqdishyshi seetey?	Weligaa muqdisho ma tagtay?
Maya, illow hada ing jeethy	Maya, illow hada injeethe	Maya, lkn hada ayaan u socda
Dayuuri rahaase ambo baapur?	Dayuuri rahaase ambo baapur?	Diyaarad miyaad raacaysaa mise baabuur?
Mayba fathey ingti any baapur kory	Mayba fathey ingti ana baapur koru	Waxaan rabaa inaan baabuur fuulo
illy Baydhowy ingte ky taally?	illi Baydhowa inte ki taalle?	Isha Baydhabo xagay ku taalla
Mayba ky taalle dhinighy koofar e magaalythy	Mayba ki taalle dhinagha koofar e magaalatha	Waxay ku taallaa dhinaca koonfur ee magaalada
Withaayow ineeyy korte?	Withaayow ijeeyi korte	Saaxibow ma i gayn kartaa?
Haa hooby athy fathaase	Haa, hooba atha fathaasy	Haa, hadaad adigu rabto
Ny neped eetha ing daneeyey meelas	Na wed eetha in daneeyay meelas	Ina mari aad baan u daneeyaa goobtaasi

Dayuurothy mayba kahaase lamy sa' hiraabnomy 08:00am	Dayuurothy mayba kahaase lama sa' hiraabnima 08:00am	Diyaaraddu waxay kacaysaa sideeda aroornimo 08:00am
Suungky hirytha dayuurathy katey	Suunka hiritha dayuuratha katey	Suunka ha la xirto, diyaaraddu way kacday
Boosteejythy hamar ley ii dijhi	Boosteejatha hamar ley ii dijhi	Boosteejada xamar igu daji
ling rooji withaay ingta ky deghey he	lin rooji withaay inta ki deghey he	li jooji saaxiib, halkan baan ka dagayaa
Baasyboorkey aragdey?	Baasaboorkay aragdey?	Baasaboorkayga ma aragtay?
Huteelythy ingy feyly magaalaythy iing sheeg	Huteelatha inki feyla magaalatha iin sheeg	Hoteelada ugu fiican magaalada ii sheeg
Mayba fathey qol ijaar e	Mayba fathey qol ijaar e	Waxaan rabaa qol kiro ah
Ha dhawaaw muthany	Ha dhawaaw methane	Soo dhawoow mudane
Mayba ky farahsyna ingti any siing kooyy	Mayba ki farahsana inti ana siin kooyi	Waxaan ku faraxsanahay inaan idin imaado



## Layli:

1-U bedel weerooyinkan Afka maayga:

- ✓ Boosteejada Garoowe igu deji.
- ✓ Diyaarad miyaad raacaysaa mise baabuur?
- ✓ Waxaan ku faraxsanahay inaan imaado Buurhakaba.

2-U bedel weerooyinkan soo socda afka maxaaga:

- ✓ Geegy mayba ing jeethe magaalithy kismaanyy.
- ✓ Huteelky ingky feyly magaalythy iing sheeg.
- ✓ Mayba fathey id ijaar e.

## Cutubka 10aad

Ha atheegythow/ Wax soo iibsasho/adeegasho

MAAY	DHAWAAQ	MAXAA
Mayba ing dareere suugy	Mayba in dareere suuga	Waxaan u socdaa suuqa
Mayba fathey kar/dhar suurud leh	Mayba fathey kar/dhar suurud leh	Waxaan rabaa dhar qurxoon
Surwaal jeans e haayte?	Surwaal jeans e haayte?	Surwaal jeans ah ma haysaa?
Garbysaar hingdho ha koo rithow ha iing qopoy	Garbasaar hindho ha koo rithow ha iin qopoy	Garbasaar indhaha kaa soo rida iisoo qabo
Kopy saandal e meegha gathaasy?	Kopa saandal e meega gathaase?	Kabo saandal ah imisa ayaad iibisaa?
Kang qaab dhong my le, koo kaly ha	Kan qaab dhon ma leh, koo kale	Kani ma qurux badna, mid kale ii

iing dhiib withaay	ha iin dhiib withaay	soo dhiib saaxiib
Suutkung isky fiiriby	Suutkung iski fiiriba	Suudkan isku tijaabi bal
Dooqey kang my e any	Dooqey kan ma e ana	Dooqayga kani ma aha anigu
Kang iing haay hang nagythe	Kan iin haay, hang naghathey	Kani iisii eeg waan u soo laaban doonaa
Kiily hilib jiir e ha iing gooy arow	Kiila hilib jiir e ha iin gooy arow	Kiilo hilib saafi ah ii soo jar niyow
Dukaangky quthaarty ya ing bahaane ny wed	Dukaanka quthaarta ya in bahaane ni wed	Dukaanka qudrada ayaan tagaynaa na wad
Haano Ynaayny e isi	Haano Ynaayni e isi	inyar oo yaanyo ah isii
Eetha ingy humy hatty ley noo dhamaati basal	Eetha ingku huma hatta ley noo dhamaati basal	Aad baan ugu xumahay, hadda ayay naga dhamaatay basal.
Wal kaleed o dheeri e ya ing baahangta marwy?	Wal kaleed o dheeri e ya in baahanta mawo?	Wax kale oo dheeraad ah miyaad u baahantahay marwo?
Maya, eetha ing mahadsyngty	Maya, eetha in mahadsinta	Maya, aad baad u mahadsantahay
Baakytho hangjy e ya fathe	Baakatho hanja e ya fathe	Baakad xanjo ah ayaan rabaa
May kiing qopythe fadlan?	May kiin qowuthe fadlan?	Maxaan kuu qabtaa fadlan?

Dharky iskooleyty haayte?	Dharka iskuuleyty haayte?	Dharka iskuulka ma haysaa?
Si feyle ing atheeghyti geeky ariirey	Si feyle in atheeghati geeka ariirey	Si fiican baad u adeegatay maanta gabaryahay/inan
Beesythey ya iing deerti, nepethey.	Beesithey ya iin deerti, nepethey.	Lacagtaydii baa ii gaadhay, nabadgalyo.

### •Layli

ka jawaab su'aalahan soo socda:

1-Akhri oo u bedel weerahan soo socda afka maxaaga.

- Kopy saangdal e meegha gathaasy?
- Geegy Mayba ing dareere suugy.
- Eetha ingky humy haty ley noo dhamaathi garbysaar.
- Dukaangky quthaarty ya ing bahaane, ny wed.
- Haano bariis e isi arow.
- Suutkung meegha gathaasy withaay?

2- U bedel weerahan soo socda afka maayga.

- Kartoon xanjo ah ayaan rabaa.
- Wax kale oo dheeri ah miyaad u baahantahay mudane?
- Kani ma qurux badna mid kale iisoo dhiib walaal.
- Kani dooqayga ma' ahan.
- Waxaan rabaa dhar qurxoon.
- Surwaal jeans ah ma haysaa saaxiib?

## Cutubka 11aad

## Weerooyin loo adeegsado goobaha waxbarashada.

MAAY	DHAWAAQIISA	MAXAA
Any mayba eed ing jeela dugsyghey	Ana mayba eed in jeela dugsigey	Ani waxaan aad u jeclahay dugsigayga
Any iskoolkung mayba dhikythahaaye li' siny	Ana iskoolkun mayba dhikathahaaye li' sina	Aniga iskuulkan waxaan dhiganayaa lix sanadood
Heerky koowaad ee jaama'addy ingte ha ky qaathyti?	Heerka koowaad ee jaama'adda intee ha ka qaathati?	Heerka koowaad ee jaamacada xagaad ku soo qaadatay?
Mayba ha ky qaathythey jaama'addii lafooly	Mayba ha ka qaathathey jaama'addii lafoole	Waxaan ku soo qaatay jaamacaddii lafoole
Beriyey mayba bilaawytthey imtihaangki ingky dembooyi	Beriyey mayba bilaawathey imtihaanki inki dembooyi	Maalinta berri waxaa bilaaban doona imtixaanka ugu dambeeya
Walbarashy jeela, illow imtihaangka kahathe ma	Walbarashi jeela, illoe imtihaanka kahathe ma	Waxbarashadu waan jeclahay, balse waxaan necbahay imtixaanka
Hambalyy kaalingty koowad	Hambalyi kaalinta koowaad ya in galli	Hambalyo, kaalinta koowaad

ya ing galli fasalking dhong	fasalkin dhon	ayaad u gashay fasalkiina oo dhan
Ame dhamaayi doongty jaama'addy?	Ame dhamaayi doonta jaama'adda?	Goormaad dhamayn doontaa jaamacada?
Natiijyithi wal ha dhejiyey ha niinf fiiriby withaay	Natiijithi wal ha dhejiyey, haniin fiiriba withaay	Natiijadii ma ls soo dhejiyay, bal noo soo fiiri saaxiib
Lang dhiyi dhong my jey ilaahey mahadis	Lang dhiyi dhong mi jeru ilaahey mahadis	Cid dhacday ma jirto ilaahey mahaddiisa
Dethaali ya dambar dhame	Dethaaliya dambar dhame	Nin dadaalay baa dambarka caba
Si feyly ing dethaal	Si feyle in dethaal	Si fiican u dadaal

MAAY	DHAWAAQ	MAXAA
Buugo hisaab e ha iing gad	Buugo hisaab e ha iin gad	Buug xisaab ah ii soo gad
Far suurud le ya abtughaasy	Far suurud le ya abtugaasu	Far qurxoon baad qoraysaa
Gee jimaathy e iskoole fasahwu	Gee jimaatha e iskoole fasahwu	Maalinta jimcaha iskuuladdu waa fasax
Maadythe athy eed ing hiiseyaasy?	Maadathe atha eed in hiiseyaasa?	Maadadee baad u xiisaysaa?
Mayba deeg walbarashy e ku helay jaama'ad ky	Mayba deeg walbarashi ku helay jaama'ad ki	Waxaan deeq waxbarasho ka helay jaamacad ku

taally Turkighy	taalla Turkigha	taalla Turkiga
May barythaasy?	May barathaasa?	Maxaad barataa?
Kulliyidy aafyraadky ya barythe	Kulliyadda aafimaadka ya barathe	Kulliyadda caafimaadka ayaan bartaa

### Layli

ka jawaab su'aalahan soo socda:

1-U bedel weerooyinkan soo socda afka maayga.

- ✓ Natijada ma la soo dhejiyay,
- ✓ maalinta jimcaha iskuulada waa fasax
- ✓ Buug English ah iisoo gad,
- ✓ si fiican u dadaal
- ✓ Hambalyo kaalinta 2aad ayaad ka gashay iskuulkiina oo dhan.

2-Akhri oo u bedel afka maxaaga weerahan soo socda.

- ✓ Ame dhamaayy doonty iskoolky?
- ✓ Walbarashy jeela illow imtihaangka kahathe ma
- ✓ Maadythe eed ing hiiseyaasy Haliimy?
- ✓ Aliyow may barythaasy athy?
- ✓ Far suurud doryng ya abtughaasy withaay.

---

**Cutubka 12aad**
**Aafymaadky/Caafimaadka:**

MAAY	DHAWAAQ	MAXAA
Aafymaadky ky waryng	Aafimaadka ku warang	Caafimaadkaaga ka waran
Walaagho shugsyna, illlow haty roony Ilaahey mahadis	Walaagho shugsana, ilow hata roony ilaahey mahadis	Xoogaa waan yara xanuunsanahay, balse iminka waan ladanahay ilaahey mahadis
Ingte lyku hele sheybaar tayy le, o ly hupy?	Inte la ku hele sheybaar tayi le, o la hupa?	Xagee laga helayaa shaybaar tayo leh, oo la hubo?
Eetha ing jiriny geeky	Eetha in jirina geeka	Aad baan u xanuunsanahay maanta
Hergeb ya ky haaye?	Hergeb ya ka haaye?	Hargab miyaa ku haya?
Walaagho qandhy e ya dareemohaayy	Walaagho qandha e ya dareemohaaye	Inyar oo xummad ah baan dareemayaa
Haba digtoorka kiing jeeyey	Haba digtoorka kiin jeeyey	Na wad/ina mari dhaktarka ayaan kuu gaynayaa
Raajity ingti ly saaro feyle	Raajiti inti la saaro feyele	Raajito in la saaro ayaa fiican
Wal lahaw e ya ky haaye?	Wal lahaw e ya ka haaye?	Wax xanuun ah miyaa ku haya?

Si feyly ing neefsoy, howy bathyng qaathoy	Si feyle in neefsoy, hawu bathan qaathoy	Si fiican u neefso, hawo badan qaado
Haangshyhung mayba jeeyase farmashiithi Eenow, mayba ha ky siyey daawy	Haanshathun mayba jeeyase farmashiithi Eenow, mayba ha ka siyey daawu	Warqadan waxaad gaynaysaa farmasiga Aadan, wuxuu ku soo siinayaa dawo
Digtoorky ilko ya ing seethe sithi ilkooghey hang haghaajiy	Digtoorka ilko ya in seethe, si ilkooghey han haghaajiyi	Dhakhtarka ilkaha ayaan u tagayaa si uu u hagaajiy ilkahayga
Oowky irbidy eetha iing kulaayti	Oowku irbida eetha iin kulaayti	Caawa cirbaddu aad bay ii xanuujisay
Daawything seddy bery qaathoy, reed ha iing naghoy	Daawuthung seddi beri qaathoy, reed ha iin naghoy	Dawadan 3 maalmood qaado, kadib iisoo laabo
Aloolytha i dhuuriyahaayty	Aloolatha i dhuuriyahaayta	Caloosha ayaa i xanuunaysa
Mathy dhuury ya dareemohaayy	Matha dhuuri ya dareemohaayi	Madax xanuun baan dareemayaa
Umulisythy haafaddy maybuwa Digtooraysy Hathiiy	Umulisithi haafadda maybuwa digtooraya Hathiija	Umulisada xaafaddu waa digtoorayso Khadija
Kaniing lahaw-	Kaniin lahaw	Kiniini xanuun-



roojiyy e haayte?	roojiyi e haayte?	baabi'iye ah ma haysaa?
Digtoorky hoola ky jary, waalaagho sug	Digtoorka hoola ki jare walaagho sug	Dhaktarku hawl buu ku jiraaye inyar sug
Hamiingki ingti athy wal bathyng hungdurty ya ly koo fathe	Hamiinki inti atha wal bathan hundurto ya la koo fathe	Habeenkii waa inaad waxbadan seexataa
Tilaalky sinidkung ma hany deerny	Tilaalka sinidkun ma hana deerna	Talaalka sanadkan nama soo gaarin
Suufko ha iing dhiib	Suufko ha iin dhiib	Suuf iisoo qabo
Dad bathyng ya hingdho ling fiighi geerad digtoorki hindho ya kooyi	Dad bathan ya hindho lin fiighi geerad digtoorki hindho ya kooyi	Dad badan ayaa indhaha loo fiiqay maalin dhowayd, dhakhtarkii indhah ayaa yimid
Ilaahey aafimaad deg deg e ky sii walall	Ilaahey aafimaad deg deg e kasii walaal	Alle caafimaad degdeg ah ha ku siiyo walaal

**Layli:**

ka jawaab su'aalahan soo socda:

1- Akhri weerahan soo socda kadib u badal afka maxaaga.

- ✓ Aloomay dhuury ya dareemahaayy
- ✓ Si feyly ing neefsoy howy bathyng qaathoy
- ✓ Ingte lyku hele sheybaar tayy le o ly hupy?
- ✓ Haba digtoorka kiing jeeyey
- ✓ Si feyle ing hungduraase hamiingki?
- ✓ Digtoorky mashquulsinya, walaagho sug withaay
- ✓ Ilaahey kiing futhythaayy hoola
- ✓ Meegha sa' ya hungduraasy hamiingki?

2- U bedel weerahan soo socda afka maayga.

- ✓ Umulisada xaafadda waa digtooraysa Fowziya
- ✓ Dhakhtarka ugu weyn ee magaalada waa Mudane Cabdixaliim
- ✓ Talaalka sanadka nama soo gaarin
- ✓ Caafimaadkaaga ka waran
- ✓ Daawadan 2 isbuuc qaado, kadib iisoo laabo
- ✓ Waxaa wanaagsan in la saaro raajito
- ✓ Suufkaasi iisoo qaad yariisow
- ✓ Warqadan waxaad gaynaysaa isbitaalka magaalada, wuxuu ku soo siin doonaa daawooyin
- ✓ Alle caafimaad degdeg ah ha ku siiyo eedo
- ✓ Dad yar ayaa indhaha loo fiiqay.

## Cutubka 13aad

## Raashing/Cuntada.

MAAY	DHAWAAQ	MAXAA
Eetha ing baahany, withaayow muqaayy ingte ky taally?	Eetha in baahana, withaayow muqaayi inte ki taalla?	Aad baan u gaajaysanahay saaxiib, xagay ku tallaa maqaaxi?
Mayba ky taalle laamyghaas reedshey	Mayba ka taalle laamighaas reedshey	Waxay ku taallaa laamigaas gadaashiisa
Meelung kapalyeeri feyly my roogho, hanoo wed	Meelun kaw(p)alyeeri feyla ma roogho, hanoo wed	Meeshan kabalyeeri fiican ma joogee naga soo wad
Soor i wang ha iing dhiib	Soor i wang ha iing dhiib	Soor iyo caano iisoo dhiib
Shaahi fathaase?	Shaahi fathaase?	Shaah ma rabtaa?
Mayba ly rooghe waqtighii shafardhigy	Mayba li rooghe waqtighii shafardhigga	Waxaa la joogaa xilligii quraacda
Any Mayba ky qura'they angejery i marag hiraab welby	Ana mayba ka qura'they anjeera i marag hiraab welba	Anigu waxaan ku quraacdaa canjeero iyo maraq subax walba
Ariitung shaahi kariyow dhong my gorythaasy	Ariitung shaahi kariyow dhon ma gorathaasu	Gabadhan/inantan shaaha karintiisa ma garanayso
Haaf bariis e ya fathaase ambo so'	Haaf bariis e ya fathaase ambo	Haaf bariis ah miyaad rabtaa mise

shaleethis ya kiing sheene?	so' shaleethis ya kiin sheene?	hibil kaligiisa ayaan kuu keenayaa?
Hungury ly hareepi ya iing sheenase, arow langkung fiiriyaby	Hunguri la hareepi ya iing sheenase, arow lankun fiiriyaby	Cunto la soo reebay miyaad ii keenaysaa, war bal ninkan eega
Rooty i ukung ya diyaar e muthany	Rooti i ukun ya diyaar e methane	Rooti/kimis iyo ukun ayaa diyaar ah mudane
Ame asheeyasy athy withaay?	Ame asheeyasa atha withaay?	Goormaad cashaynaysaa saaxiib?
Bathyna hiraabti mayba dhamey koob kafey e , ambo koobko shaahi e	Bathanaa hiraabti mayba dhamey koobko kafey e, ambo koobko shaahi e	Inta badan aroortii waxaan cabaa koob kafee ah, ama koob shaah ah
Muqaayithi Aw ibdow ya seethane geegy isdiyaari	Muqaayithi aw ibdow ya seethane geega isdiyaari	Maqaayaddii Aw cabdi ayaan tagaynaa maanta is diyaari
Miisko binaaw niing raathi niyow, waany meelo hangfar le niing qopoy	Miisko binaaw niin raathi niyow, waana meelo hangfar le niin qopoy	Miis banaan noo raadi ninyahaw, meel neecaaw leh na noo qabo
Dalabking ha sheegytha	Dalabking ha sheegatha	Dalabkiina soo sheegta
Yariisow mallaay i bataaty iing sheeng any	Yariisow mallaay i bataata iing sheeng ana	Yiriisow kalluun iyo bataati ii keen anigu, intaas baan aad u

haanasa hanung jeela	haanasa hanung jeela	jeclahay
Galaasko biyy mayaang e iing sheeng	Galaasko biyi mayaang e iing sheeng	Galaas biyo macaan ah ii keen
Kapalyeeri mayba koofathey haangshithy qarashaadky	Kapalyeeri mayba koofathey haanshitha Qarashaadka	Kabalyeeri waxaan kaa rabaa warqadda qarashaadla
Muuqaayithung eetha ing nuurahaayty allow	Muqaayithun eetha ing nuurahaayte allow	Maqaayaddan aad bay u shidantahay wallee
Marki athy hungury aamasy bismingky ku bilaaw	Marki atha hubguri aamasu bismingky ku bilaaw	Markaad cunto cunayso bissinka ku bilow
Wang gaal ya ii feylahaayti	Wang gaal ya ii feylahaayti	Caano geel baa igu fiicnayd
Mar welby haky dhawaaw muaayithung	Mar welb haka dhawaaw muqaayithun	Mar walba ku soo dhawoow maqaayaddan
Eetha ing dhereggi geegy ilaahey mahadis	Eetha ing dhereggi geega ilaahey mahadis	

---

## Layli

### ka jawaab su'aalahan soo socda:

1-Akhri weerahan soo socda:

- ✓ Miisko binaaw niing raathi niyow, waany meelo hangfar le niing qopoy
- ✓ Muqaayithung eetha ing nuurahaayty allow
- ✓ Rooty i ukung ya diyaar e muthane, haky dhawaaw
- ✓ Ame qatheeyasy athy?
- ✓ Yariisow mallaay i bataaty iing sheeng athy o mahadsyng

2-U bedel weerahan soo socda afka maayga.

- ✓ Inta badan aroortii waxaan cabaa koob kafee ah ama koob shaah ah
- ✓ Cunto la soo reebay miyaad ii keenaysaa, war bal ninka arka
- ✓ Aad baan u gaajaysanahay saaxiib, xagay ku taallaa maqaaxi fiican?
- ✓ Waxaa la joogaa xilligii quraacda
- ✓ Maqaayaddii Aw cabdi ayaan tagaynaa maanta, ee isdiyaari

3-U bedel weerahan soo socda afka maxaaga.

- ✓ Bathyna hiraabti mayba dhamey koobko kafey e, ambo koobko shaahi e
- ✓ Mar welby haky dhawaaw muqaayithung
- ✓ Yariisow angjeery i rooty iing sheeng, koobko wang eny ha iingky dar
- ✓ Dalabking ha sheeghytha

### Cutubka 14aad

Afky i dhaghanky/Luuqada iyo dhaqanka:

MAAY	DHAWAAQ	MAXAA
Mayba jeela ingti any barathy afky maayky	Mayba jeela inti ana baratho afka maayka	Waxaan jeclahay inaan barto afka maayga
Mayba ky dowaha kore shang af	Mayba ku dowaha-kore shan af	Waxaan ku hadli karaa shan af
Af ingiriisky eetha ing gorythe	Af ingriiska eetha in gorathe	Afka English-ka aad baan u garanayaa
Ky hathaly-korte afmaay?	Ka hathala-korte afmaay?	Ma ku hadli kartaa Afmaay?
Hoo fathaasy shiineesa kiingky hathale	Hoo fathaasa shiineesa kiinka hathale	Hadaad rabto shiinays baan kuugu hadli karaa
Mayba barathey afmaayky marki any Baydhowy seethy	Mayba barathey afka maayka marki ana Baydhowa seetho	Waxaan baran doonaa afmaayga markaan tago Baydhabo
Af Arapi ame baryti?	Af Arawi ame barati?	Af Carabigu goormaad baratay?
Meegha siny ya barathaasi Af ingiriisky?	Meegha sina ya barathaasi af ingiriiska?	Imisa sano ayaad baranaysay Af ingiriiska?
Mayba barythahaaye wal	Mayba barathajaaye wal	Waxaan baranayaa in

ku bathyng lamy bilood	ku bathan lama bilood	kabandan laba bilood
Deeghaanking may aang ky eyi?	Deeghaankin may aang ki eyi?	Deegaankiina maxaa caan ku ah?
Dhaghang suubung ii is qederiyow ya aang ky eyi	Dhaghan suubun ii is qederiyow ya aan ky eyi	Dhaqan suuban iyo is qadarin ayuu caan ku yahay
Baadiyaathy hora seetey?	Baadiyaatha hora seetay?	Miyiga horay ma u aaday?
Mar bathyng ya seethi	Mar bathan ya seethi	Marar badan ayaan tagay
Aniiny amyng dhow ya ing jeethy	Aniina aman dhow ya injeethe	Aniguna waqti dhow baan u socdaa
Soor i wang ya eed ingky hiistey maay	Soor i wan ya eed ingka hiistey maay	Soor iyo caano baa aad ugu xiistay miyaa
Beer apuurky marki ly deery ya israhaany	Beer awuurka madki li deero ya israhaane	Beer abuurka markii la gaaro baan israacynaa
Ilaahey ny deersii	Ilaahey ni deersii	Alle ha ina gaadhsiiyo
Ilaahey ethingshey	Ilaahey ethinshey	Alle idankiisa



---

**•Layli:****ka jawaab su'aalahan soo socda:**

✓ Akhri oo u bedel weerahan soo socda afka maxaaga.

1. Deeghaanking may aang ky eyi?
2. Aniiny amyng dhow ya ing jeethy
3. Af Taliyaani ame barati?
4. Hoo fathaasy Af jarmal ya kiingky hathale
5. Meegha siny ya barythaasi afmaayky?
6. Mayba ky dowaha kore Afar af

2-U bedel weerooyinkan soo socda afka maayga.

1. Miyiga horay ma u aaday?
2. Dhaqan suuban iyo qadarin buu caan ku yahay
3. Af shiinaysku goormaad baratay?
4. Anigu waan ku hadli karaa afka maayga
5. Waxaan baran doonaa afmaayga markaan tago  
Wanlaweyn.

### Cutubka 15aad

Shaqooyinky i hirfatho/Shaqooyinka iyo xirfadaha:

MAAY	DHAWAAQ	MAXAA
Meeghy siny shaqy laang haayti?	Meegha sina shaqa laan haayti?	Imisa sanadood ayaad shaqo la'aan ahayd?
Ingti any iskool ha dhamaayiby shaqy feyly ma aragny	Inti ana iskool ha dhamaayiba shaqa feyla ma aragne	Intaan iskuul soo dhamreyay ba shaqo fiican ma aanan arag
Maybuwaa ingti athy shaqy ky weydiisaty hafiise dalky	Maybuwaa inti atha shaqa ku weydiisata hafiise dalka	Waa inaad shaqo ka raadsataa xafiisyada dalka
Mayba fathey ingti any edsithy booskaas hooby binaawii	Mayba fathey inti ana edsitha booskaas hooba binaawii	Waxaan rabaa inaan codsado booskaasi haduu banaanyahay
Taas ingy welwelloy, ani koo halliye	Taas inka welwelloy, ani koo halliye	Ha ka welwelin taasi, aniga ayaa kaa xallinaaya
Hirfydda may ety?	Hirfadda may eta?	Waa maxay xirfaddaadu?
Anny mayba aha lang hisaapiyy e	Ana mayba aha lan hisaawiya	Anigu waxaan ahay nin xisaabiye ah
Muthane mayba koo edsithey mushaar	Muthe Mayba koo edsithey mishaar kordhiyow,	Mudane waxaan kaa codsanayaa mushaar kordhin,

kordhiyow, maadaama any wal bathyng suubiyi	maadaama ana wal bathang suubiyi	maadaama aan wax badan sameeyay
Mayba ly fathey Tumung lang haanas o le hurfaddy injineernimy	Mayba la fathey tumun lan o le hurfadda injineernima	Waxaa la rabaa 10 qofood oo leh xurfadda injineernimo
Lang ing shaqeey siny shaahy my dhamow	Lan in shaqeey sana shaahi ma dhamow	Nin aan shaqaysan shaah ma cabo
Mayba fathey mustagbalky dhow ingti any naghathy Digtoor wiing	Mayba fathey mustagbalka dhow inti ana naghatha digtoor wiin	Waxaan rabaa inaan mustaqbalka dhow noqdo Dhakhtar weyn
Digtoorky mayba daawayey dadky jiring o dhong	Digtoorka mayba daawayey dadka jirin oo dhon	Dhakhtarka wuxuu daweeyaa dadka xanuunsan oo dhan
Wariyini matha maybuwa ing etheeghowky bulshoohy	Wariyini matha maybuwa in atheeghowka bulshooha	Wariyanimadu waa u adeegidda bulshada
Eenow maybuwa lang beeraley e	Eenow maybuwa lang beeraley e	Aadan waa nin beeraley ah

**•Layli:****ka jawaab su'aalahan soo socda:**

- ✓ U bedel weerooyinkan soo socda afka maayga.
  1. Nin aan shaqaysan shaah ma cabo
  2. Anigu waxaan ahay nin xisaabiye ah
  3. Waxaan rabaa inaan codsado booskaasi haduu banaanyahay.
- ✓ Buuxi meelaha bannaan:
  1. Ingti any iskoolky ha dhamaayiby -----Feyly ma aragny.
  2. Digtoorky mayba ----- dadky jiring oo dhong.
  3. Mayba fathey mustagbalky dhow ingti any naghathy digtoor -----.
- ✓ Akhri weerahan soo socda, kadib u bedel Afka Maxaaga.
  1. Muthane mayba koo edsithey mushaar-kordhiyow, maadaama any muddy bathang ha shaqeeyi.
  2. Meegha siny ky shaqeeyahaayty meelung?
  3. Taas ingky welwelloy withaay, ani koo halliye.
  4. Wariyinimatha maybuwa ing etheeghowky bulshoothy.
  5. Hirfaday maybuwa injineernimy.

**Ereyo:****B**

Bitheer	Bidaar
Barathow/Barashy	Waxbarasho
Biryimow	Leexasho/Weecasho
Baalley baroorow	Baalleybaroorow
Beeday	Damiin

**P**

Eper	Eber
Wepy	Webi
Heped	Xabad-ka

**T**

Taagdory	Tabardarri
Tagrafalow	Wax isdabamadin hantiyeed
Takoor	Cunsuriyad
Tiriyow	Wax tirin
Tumoow	Garaacid
Jarangjary	Jaranjaro
Jeel	Jacayl
Jelmed	kirli
Jiky	
Jukaayow	Garaacid

**JH**

Jhab	jab/guuldarro
Jhajha	Biriq-da
Jhilaanghiliyey	Nooc shimbiraha kamid ah

Jharoow Jarid geed iwm

Jheerow Xishood

**D**

Dapeel Dabayl

Dereng

Dareer Socod

Dareeng Dareen

Darraaw Xaqiraad

**TH**

Wethaang wadaanta biyaha laga dhaansado

Fathow Rabitaan

Mithoow Madow

Itheed Nooc geedaha kamid ah

Etheeg Adeeg

**R**

Rakapow Samayn

Reed Gadaal

Roor Orod

Rooyow Guul

Ruong Guri

**S**

Sabty Sabti

Saang Tallaabo

Saghaal Sagaal

Samaang Wanaag

Sahariir Xanuujin

**SH**

Shiid	Dhagax
Shillaay	Shalayti
Shafar	Gaajo
Shing	Xilli
Shalbiyoow	Kala saarid

**DH**

Dhaly	Dhalo
Dhammoow	Cabitaan
Dhalaang	Ubad
Dhaghang	Hiddo
Dhejy	Bahal/Mas

**G**

Garas	Nooc dhirta waaweyn kamid ah
Galang	Gacan
Galaanjhy	Qaado
Gaasir	wax aan dhamaystirnayn
Gemoow	Wax la tuuray

**GH**

Raghiis	Raqiis
Boghol	Boqol
Maghy	Magac
Meghel	Rag
Beghel	Nooc dhirta kamid ah

**F**

Fardhowoow	Suuldhabbaalays/markii farta iyo suulka la dhaqaajiyo codka ka dhasha
Farjhis	Daadin

---

Fal	Ficil
Feleghow	dib u Qodid god iwm
Fiihiyoow	kala dirid

**Q**

Qothoow	Qoditaan
Qiib	Qayb
Qirithow	Qiraal
Qoomow	ka shakin
Quursythow	rajo ka dhigid

**K**

Kothyloob	fadhiga dhalinta(kadaloob)
Kawaang	Sariibadda hilibka
Kahoow	soo kicid
Kopy	Kabo
Koofar	Naanays

**L**

Lang	Nin
Lahaw	Xanuun
Lipee	Libaax
Ludaay	Ayaxa waaeyn
Laashing	Abwaan

**M**

Mathal	isu-imaatan(dhaqankii miyiga ayaa laga soo qaatay Ereygan)
Marty	Marti
Mareer	Nooc dhirta kamid ah oo mirihiisu aad u macaan



Maghuuf                      Qof waxqabad leh

Mayaang                      Macaan

## **N**

Nafaqy                      Nafaqo

Neped                      Nabad

Neebsy                      Nasasho

Nahoow                      Naxdin

Nur                      Caws

## **NG**

Sang                      San

Ming                      Qol

Dang                      Dan iyo xaajo

Beeng                      Been

Bung                      Bun

## **W**

Weel                      Ubad

Withaay                      Saaxiib

Wariify                      Qof warbadan

Waraapy                      Dhurwaa'

Wengtaab                      Qof madax adag

## **H**

Hilimy                      Riyo

Haruub                      Dabool

Hapaar                      Inkaar

Hangraar                      Dib-qallooc

Hasuus                      Xusuus

## **Y**

Yoong qof la canaanto

Yaab Cajab

Yas Xaqiraad

Yahaas Yaxaas

Yaraang Waxyar

**NY**

Nyaany'y Yaanyo

Nyaanyury Bisad

Nyisheey Yariisey



## Dhamaad

Allaah mahadii waxaa halkan noogu dhamaaday buugii koowaad ee Barashada Afka maayga,

Waxaan rajaynayaa inaad wax badan ka faa'iday afka hooyo ee Maay, hadda waxaad ogaatay in afka maayga uu yahay luuqad jirta oo leh tix iyo tiraab, naxwe, suugaan, mahmaahyo, gabayo, iwm.

Sidoo kale waxaad ogaatay in afka maaygu leeyahay Far u gaar ah oo la qori karo.

Buuggan koowaad waxaan ugu talagalay dadka jecel ama xiisaynaya barashada afka maayga

Waxaan rajaynayaa inaan waqti dhow soo saaro buugga labaad ee Barashada afka maayga, kaasi oo aad ku baran doontaan dhismaha hadalka, naxwaha, sheekooyinka, iyo maahmaahyooyinka.

FG: Buuggan waxaan u soo fasaxay si bilaash ah, waxaa reeban in la iibiyo, am siyaabo khaldan loo adeegsado, wabillaahi towfiiq.

### Taariikhda qoraaga:

Cabdiraxmaan Yoonis Abshir (Caqiil), waxaa uu ku dhashay magaalada Baydhabo ee gobolka Baay, wuxuuna kamid yahay da'yartii ku soo barbaartay waxna ku baratay dalka, wuxuu aad u xiiseeyaa Barashada Afafka kala duwan, wuxuu wax ka qoraa arimaha bulshada, sida:

Taariikhda, Juqraafiga, Dhaqaalaha, Afafka iyo xadaaradaha kala duwan, wuxuuna ku talo jiraa inuu soo saaro buugaag waxtar u leh bulshada soomaaliyeed, wuxuu ku jiraa qaybihii u dambeeyay ee jaamacadda, wuxuu bartaa kulliyadda dhaqaalaha iyo culuumta maamulka, sanadaha soo socda wuxuu hiigsanayaa inuu gaaro horumar la taaban karo.

---

**TIXRAACYO:**

- ✓ Qur'aanka Kariimka ah.
- ✓ Af Maay Buugga 1aad  
[maslah isak Borow ablykusow & Ibrahim Yusuf Haaji].
- ✓ Afyaalky Afky soomaalighy maayky  
[Dr Abdilahi Sheikh Mohamed].
- ✓ Elif Maay [ Husseeng Hasanow mursal].
- ✓ Elif Bilaaw[Mahamad Hasang Usmaang abwaang Anjeeh].
- ✓ Bahda Afafka Kushitiga [Dr Abdalla Omar mansur].

Waxaan soo dhawaynaynaa fikradihiina iyo talooyinkiina, farxad bay noo tahay inaan talooyinkiina helno si aan buugaagta dambe wax ugu soo daro, ama wax ka badalno,Wixii talo iyo tusaale ah waxaad noogu soo gudbin kartaan:

Email: Ebdirahman45@gmail.com.

Facebook: Abdurrahman Caqiil.

Baidoa---Somalia

August 2020